FAAFINTA RASMIGA

الجريدة الرسمية

# DAWLAD PUNTLAND EE SOOMALIA

## لولاية أرض بونت الصومال

**Sanadka 14-aad. Garowe November 19, 2012** **Lam.11**

**Faafinta bil walba soo baxda** جريدة الشهرية

***Qaybta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawladda Puntland***

Qiimuhu waa Sh.So 10,000 rukun walba . Sanadkii waa Sh.So 170,000 dalka gudihiisa, dalka dibaddiisa Sh.So 500,000 rukunka la waydiisto, waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilawdaa 1-da January. Qiimaha qoritaan F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So 3,000, rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa qeybta maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha barriga ee wasaaradda maaliyadda.

---

## TUSMADA

**Qaybta Koowaad**

**Sharciga Wareejinta Maxaabiista La Xukumay**

**Qaybta labaad**

**Xeer**

**Waxba ma leh**

**Qeybta Saddexaad**

**Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.**

**Waxba ma leh**

***Sharci Lr 17. ee 19/11/2012, kuna saabsan Sharciga Wareejinta Maxaabiista la xukumay .***

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

ولاية بونت لاند الصومالية

PUNTLAND STATE OF SOMALIA

**Sharci Lr.17 ee November 19, 2012, kuna saabsan Sharciga Wareejinta Maxaabiista La Xukumay .**

Madaxweynaha Dawladda Puntland

Markuu arkay: Dastuurka Dawladda Puntland qodobkiisa 80-aad;

Markuu arkay: Ansixinta Golaha Wakiilada Puntland ee Summad XGGW/DPL/112/2012 ee 15/11/2012;

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda xeerkani u leeyahay Dawladda Puntland.

## Wuxuu soo saaray

Xeerkan soo socda:

### Qodobka 1-aad

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Sharciga Wareejinta Maxaabiista La Xukumay

### Qodobka 2-aad

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala keydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee DPL.

### Qodobka 3-aad

Dhaqangalka Sharcigan wuxuu noqonayaa maalinta 16-aad laga bilaabo maalintuu faafinta rasmiga ah ee Dawladda ku soo baxay, kaas oo laga baahinayo idaacadaha, baahinta ka dib ayaa Sharcigani dhaqan gelayaa, cid kastana ay waajib ku tahay inuu dhawro kuna dhaqmo.

**Dr. Cabdiraxmaan Maxamed Maxamuud**
**Madaxweynaha Dawladda Puntland**

DAWLADDA PUNTLAND
EE SOMALIYA

PUNTLAND STATE OF
SOMALIA

**GOLAHA WAKIILADA** | **HOUSE OF REPRESENTATIVES**

*Xafiiska Guddoomiyaha* | *Office of the Speaker*

*Ref:-* XGGW/DPL/ 112 /2012 | Garoowe, Khamiis | Date:- 15/11/2012

**Ku:- Madaxweynaha DPL** | Garoowe

Ujeeddo:- **Ansixinta Xeerka Wareejinta Maxaabiista La xukumay**

**Guddoommiyaha Golaha Wakiilladdu:-**

| | |
|---|---|
| MARKUU ARKAY:- | Dastuurka DPL qodobkiisa 64-aad |
| MARKUU ARKAY:- | Soo gudbinta Madaxweynaha ee Ref MW/DPS/ 229/2012 ee October 17, 2012 kuna saabsan Xeerka wareejinta Maxaabiista la xukumay ee Dawladda Puntland. |
| MARKUU TIXGELIYEY:- | Baahida loo qabo Xeerkan |
| MARKUU DHEGAYSTAY:- | Doodii iyo Go'aankii Golaha Wakiillada ee 13/11/2012 |

**WUXUU GUDDOOMIYEY:-**

Ansixinta Xeerka wareejinta Maxaabiista la xukumay Dawladda Puntland.

**Allaa Mahad Leh**

**Cabdirashiid Maxamed Xirsi**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.**

Guddoomiyaha Golaha Wakiilada
Speaker of the House of Representatives
PUNTLAND STATE

DAWLADDA PUNTLAND

EE SOMALIYA

PUNTLAND STATE OF SOMALIA

# XEERKA WAREEJINTA MAXAABIISTA LA XUKUMAY EE DAWLADDA PUNTLAND

**Garoowe, November 15.2012**

## XEERKA WAREEJINTA MAXAABIISTA LA XUKUMAY

## QAYBTA I: QEEXIDDA ERAYADA

### QODOBKA 1-AAD

Xeerkan dhexdiisa waxaa loola jeedaa:

1. **Dawlad**: waxaa loola jeedaa Dowladda Puntland;
2. **Waddan la tilmaamay**: waxaa loola jeedaa waddan kasta oo dowladda puntland la gashay
3. **Hay'adda awoodda u leh**: waxaa loola jeedaa Wasaaaradda Cadaaladda ee Dowladda Puntland;
4. **Wasiir**: waxaa loola jeedaa wasiirka caddaaladda;
5. **Taliye**: waxaa loola jeedaa Taliyaha Ciidanka Asluubta ee Dowladda Puntland. heshiis la xiriira wareejinta maxaabiista;
6. **Wareejin:** waxaa loola jeedaa in qofka la xukumay laga soo wareejiyo waddan la tilmaamay oo loo soo wareejiyo DPL ama in laga wareejiyo DPL loona wareejiyo waddan la tilmaamy;
7. **Warrant:** waa dukuminti kasta ee maxkamadeed oo khuseeya wareejinta maxbuus la xukumay;

## QAYBTA II
## KU SOO WAREEJINTA MAXAABIISTA DOWLADDA PUNTLAND

### QODOBKA 2-AAD

Marka waddan ama maamul madaxbannaan Dowladda Puntland heshiis kula gasho in lagu soo wareejiyo maxaabiis xukuman, Wasiirku wuxuu u howl-galayaa tillaabooyinkii lagu dhowri lahaa looguna hóggaansami lahaa shuruudaha heshiiska lala galay dhinaca kale iyo sharciyeyntiisa.

### QODOBKA 3-AAD

(1) Wasiirka ayaa go'aan ka gaaraya kaddib marka uu latashado Xeer Ilaaliyaha Guud ee Dowladda Puntland marka uu ka helo mas'uuliyiinta waddan la tilmaamay codsi qeexaya in:

(a) qof la xukumay ama wakiilkiisu uu dalbaday in loo wareejiyo DPL oo wadankaasna uu ku raacay wareejintaas;

(b) Waddankaasi uu codsaday wareejinta noocaas ah marka loo eego heshiis caalami ah oo arrintan ku saabsan aan qofka la xukumay oggolaanshihiisa loo baahnayn.

(2) Wareejinta maxbuuska la xukumay waxaa la soconaya dukumintiga iyo macluumaadka uu u baahan yahay waddanka la tilmaamay ama maamul iskiis u jira iyada oo la raacayo nidaamka caalamiga ah.

(3) Wasiirku, sida ku xusan baaragaraaf 1 (a), wuxuu ka codsan karaa dhinaca kale ee heshiiska inuu u soo gudbiyo xog tilmaamaysa haddii qofka la xukumay sababo la xiriira xaaladdiisa maskaxeed ama jireed ama da' ahaaneedba ay u muuqato in uusan awoodin in uu ismaamulo si loogu oggolaado wakiil matala.

(4) Wasiirku waa diidi karaa wareejinta maxbuuska la xukumay haddii muddada xabsiga uga harsan tahay wax ka yar 6 bilood marka laga reebo duruufo gaar ah.

## QODOBKA 4-AAD

(1) Marka uu wasiirku go'aan ka gaarayo codsi wareejineed wuxuu go'aanka ku wargelinayaa cidda ay khuseyso ee waddanka la tilmaamay. Haddii Wasiirku ku qanco wareejinta, wuxuu soo saarayaa qoraal rasmi ah.

(2) Qof la xukumay ama wakiilkiisa oo ka cabanaya go'aanka wasiirka oo kama dambays ah wuxuu u dacwoonka karaa maxkamadda awoodda u leh.

(3) Marka uu Wasiirku oggolaado wareejinta qofka la xukumay, wuxuu soo saarayaa qoraal oggolaanaya:

(a) Keenitaanka qofka la xukumay laga keenayo waddan la tilmaamay lana keenayo DPL.

(b) Qaadista qofka la xukumay ay qaadayaan cid loo idmaday oo ay u qaadayaan meesha lagu xirayo; iyo

(c) Ku-xiridda qofka la xukumay xabsiga Puntland iyada oo la raacayo tilmaamaha warqadda warrantiga ah.

## QODOBKA 5-AAD

Markii muwaaddin waalan oo u dhashay DPL kuna sugan waddan la tilmaamay oo maxkamadi amartay in la hayo waxaa loo soo wareejin karaa Puntland, haddii ay sidaas codsadaan cidda ay khuseyso oggolaanshana laga helo Xeer Ilaaliyaha Guud.

## QODOBKA 6-AAD

Dhammaan qaababka isgaarsiinta ee la xariira wareejinta qofka la xukumay waxay marayaan hab-nidaameedka sharcigu tilmaamayo.

## QODOBKA 7-AAD

(1) Nuqulka xukunka ah ama amar kale ee ka soo baxa maxkamadda waddan la tilmaamay waxaa loo aqoonsanayaa inuu leeyahay awoodda xukun ama amar ka soo baxay maxkamadda Puntland.

(2) Dukumiinti kasta oo uu tasdiiqay sarkaal makmadeed ama sarkaal u xilsaaran ee waddanka maxbuuska lagu xiray waxaa loo aqbalayaa sidii dukumiinti rasmi ah haddii aysan ka hor imaanayn sharciga Puntland.

## QODOBKA 8-AAD

(1) Maxbuuska lagu wareejiyey dowladda puntland ee lagu xukumay muddo xabsi ah:

(a) Wuxuu ku dhammaysanayaa muddada xabsiga uga hartay isla puntland;
(b) Wuxuu helayaa xabsi-dhimid la xiriirta muddada xabsiga uu ku soo qaatay waddanka laga keenay;
(c) Wuxuu kale oo helayaa xabsi-dhimid mudadda uga hartay xabsiga si waafaqsan xabsi-dhimista sharciga Puntland.

## QODOBKA 9-AAD

(1) Qofka la xukumay ee la soo wareejiyey waxaa lagu xirayaa xabsi ama xarun kale oo Wasiirku oggolaado.

(2) Qofka aan qaangaarka ahayn oo la xukumay laguna soo wareejiyey Puntland haddii lagu helo dembi waxaa lagu qaadayaa Sharciga Carruurta ee DPL.

## QODOBKA 10-AAD

Kormeerayaasha kuwa gudaha, goboleedka iyo kuwa caalamiga ah waxaa loo fududeynayaa oggolaansha booqashada maxaabiista la soo wareejiyey iyada oo la raacayo sida uu qabo xeerka xabsiyada DPL.

## QAYBTA III
## KA WAREEJINTA MAXAABIISTA DPL

## QODOBKA 11-AAD

(1) Haddii ay heshiis wada-galaan DPL iyo waddan kale oo la tilmaamay, waxaa waajib ah in Taliyaha xabsiyadu ku wargeliyo maxaabiista la xukumay ee u dhashay waddanka la tilmaamay ujeeddada laga leeyahay heshiiska wareejinta.

(2) Qofka la xukumay wuxuu warqad codsi ah u qoran karaa Wasiirka isaga oo u sii marinaya Taliyaha xabsiga si loogu wareejiyo waddanka la tilmaamay.

(3) Iyada oo la eegeynin waxa ku cad baragaraafka (2) Wasiirku wuxuu dalban karaa in qofka la xukumay laga wareejiyo DPL isaga oo uusan codsan qofka la xukumay haddii wareejinta noocan ah lagu qeexay heshiiska lala-galay waddanka ama maamulka la tilmaamay.

(4) Haddii uu Wasiirku mabda' ahaan oggolaado wareejinta qofka la xukumay, wuxuu war-gelinayaa hay'adda u xilsaaran ee waddanka la tilmaamay isaga oo siinaya dhammaan wixii macluumaad ah oo la xiriira maxbuuska sida:

(a) Codsiga qofka la xukumay, ama nuqul la tasdiiqiyey oo ka mid ah codsigaas;

(b) Codsiga Wasiirka ee ku saabsan wareejinta qofka la xukumay marka loo eego faqradda 3-aad ee qodobkan;

(5) Haddii ay dhacdo in waddanka hawsha loo idmaday, Wasiirka iyo qofka la xukumay, ay ku heshiiyaan wareejinta, Wasiirku wuxuu Hay'adda shaqada ku leh u dirayaa codsi uu ku muujinayo oggolaanshaha wareejinta maxbuuska goobta uu ku xiran yahay ilaa laga gaarsiinayo goobta safarku ka bilaabmanayo ee ku taala DPL iy sidoo kale gaarsiinta maxbuuska goobta lagu haynayo ee ay leedahay hay'adda hawsha ku shaqada leh ee waddanka maxbuuska loo wareejinayo.

(6) Iyada oo la eegeynin qodobada kale oo ku cad Sharcigaan, hadii waddanka la tilmaamay uu aqbalo la wareegidda maxbuus u dhashay dalkaas si uu halkaas ugu dhammeysto muddada xabsiga uga harsan, Wasiirku wuxuu raacayaa tilmaamaha ku cad faqradda (5) ee qodobkan.

## QAYBTA IV
## HAYNTA IYO WAREEJINTA MAXAABIISTA LA XUKUMAY

### QODOBKA 12-AAD

(1) Daryeelka qofka la xukumay oo lagu wareejinayo ama laga soo wareejinayo DPL waxaa ka mas'uul ah qofka loo xil-saaray ilaalintiisa.

(2) Haddii ay dhacdo in qofka la xukumay sida ku xusan faqradda (1) uu ka baxsado ilaalada sharciga ah inta uu ku jiro xuduudda DPL waxaa lagu qaadayaa sharciga Dowladda Puntland.

### QODOBKA 13-AAD

Xukunka dowladda la tilmaamay ku riddey maxbuus loo soo wareejinayo DPL waxaa la hubinayaa in uu la socon karo waafaqsanyahayna sharciyada DPL ka hor inta aan maxbuuska la soo wareejin. Ciqaabta xarigga ee maxbuuska loo soo wareejiyey DPL looma beddeli karo ganaax lamana iibsan karo.

### QODOBKA 14-AAD

(1) Haddii qof la xukumay uu xabsi ku jiro gudaha DPL, Wasiirkuna uu ku qanacsan yahay in waddanka la tilmaamay ee qofka la xukumay laga soo wareejiyey uu adeegsaday awoodda cafiska ama wixii kale oo awood ah ee dhimi kara xukunka ama xukunka ka dhigaya mid aan laga hirgelin karin waddankaas, Wasiirku wuxuu qaadayaa tillaabo degdeg ah si loo hirgeliyo go'aankaas.

(2) Marka qof la xukumay uu ku xiran yahay waddan la tilmaamay, natiijada wareejinta maxbuuska xukuman ay ka timid DPL sida uu qabo sharcigan, isla markaasna xukunku uu noqonayo mid aan dhaqangal ka ahayn DPL kaas oo horay looga dhaqan-geliyey ama loo yareeyey ama loo dhammaystiray, wasiirku wuxuu isla markiiba ku wargelinayaa Dawladda la tilmaamay xogta iyo tallaabooyinka la xiriira wareejinta maxbuuska xukuman.

## QODOBKA 15-AAD

(1) Sida waafaqsan qodobkan, kharashka wareejinta maxbuuska waxaa bixinaya DPL iyo wadanka la tilmaamay saami ahaan sida ay ku heshiiyeen.

(2) Sida waafaqsan baragaraafka (4) ee qodobkan, wareejinta qofka la xukumay ee loo wareejiyay DPL, kharashaadka wareejinta waxaa bixinaya qofka la xukumay ama wakiilkiisa.

(3) Kharash kasta oo ku xusan faqradda (2) waxaa loo tix-gelinayaa sidii deyn uu qof ka qabo Dowladda Puntland.

(4) La dabbiqimaayo bixinta kharashka ku xusan faqradda (2) iyo (3) ee qodobkan xaaladaha soo socda:

- (a) Haddii ay jiraan duruufo gaar ah ee dacwadda la xiriira;
- (b) Haddii maxbuuska la xukumay uusan awoodi Karin bixinta kharashka;
- (c) Haddii maxbuuska la xukumay uusan oggolaan wareejinta;

## QODOBKA 16-AAD

Xeerkani wuxuu dhaqan-gelayaa 16 maalmood ka dib marka lagu soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda Puntland, xeer kasta oo ka hor-imanaya Xeerkan waa la buriyey.

**Dr, Cabdiraxmaan Maxamed Maxamuud**

**Madaxweynaha Dawladda Puntland**